

**Notice to Petitioner Regarding Information
Provided in Petition and Affidavit**

***Ogeysiiska la Siiyo Codsadaha Kuna Saabsan Macluumaadka
Lagu Bixiyay Cosdsiga iyo Warqadda Dhaarta (Affidavit)***

- The information given in your Petition and Affidavit will be used by the judge when deciding whether to issue an Order for Protection.
Macluumaadka ku jira Codsigaada iyo Warqadda Dhaarta waxaa adeegsan doono Garsooraha si uu go'aan uga gaaro haddii loo baahan yahay in la soo saaro Ammarka Badbaadinta.
- You may refuse to provide the requested information. If you refuse to provide the information, the judge may not be able to issue an Order for Protection.
Waxaad diidi kartaa in aad bixisid macluumaadka la cadsaday. Haddii aad diidid in aad bixisid macluumaadka, garsooraha awood uma lahaan doono in uu soo saaro Ammarka Badbaadinta.
- If you supply the information, it will become public information as soon as the Court receives notice that the Order for Protection has been served upon the Respondent. You may, however, request that your address and telephone number not be given to the Respondent or made a part of the public file.
Haddii aad bixisid macluumaadka, wuxuu noqon doonaa macluumaad ay helaan dadweynaha isla marka Maxkamadda hesho ogeysiiska in Eedeysanaha la siiyay Ammarka Badbaadinta. Hase ahatee, waxaad cadsan kartaa in aan Eedeysanaha la siinin cinwaankaadaa iyo nambarka telefoonkaada ama in aan laga dhigin qeyb ka tirsan faylka dadweynaha.
- The Court administrator's office will deliver a copy of the Petition and Order for Protection to the sheriff, who will serve it on the Respondent.
Xafiiska maamulaha Maxkamadda wuxuu koobiga Codsiga iyo Ammarka Badbaadinta siin doonaa "sheriff", kaasoo gaarsiin doono Eedeysanaha.
- If there is a claim of child abuse contained in the Petition, it will be reported to the appropriate authority.
Haddii ay Codsiga ku jirto sheegasho in cunug lagu xad gudbay, waxaa la ogeysiin doonaa madaxda ku habboon.

Notice to Applicant/Petitioner
Ogeysiiska Arjiilaha/Codsadaha

1. Notification of a change in residence should be given immediately to the court administrator and to the local law enforcement agency having jurisdiction over the new residence of the applicant.

Marka isbaddal ku dhaco meesha qofka daggan yahay, taasii waa in isla markiiba la ogeysiyo maamulaha maxkamadda iyo wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka ee awoodda sharciga u leh meesha cusub uu soo daggay arjiilaha.

2. The reason for notification of a change in residence is to forward an Order for Protection to the proper law enforcement agency.

Sababta ogeysiiska ku saabsan isbaddalka meesha qofka daggan yahay waa in Ammarka Badbaadinta loo diro wakaaladda hirgelinta sharciga ee ku habboon.

3. The Order for Protection must be forwarded to the law enforcement agency having jurisdiction over the new residence within 24 hours of notification of a change in residence whether notification is given to the court administrator or to the local law enforcement agency having jurisdiction over the applicant's new residence.

Ammarka Badbaadinta waa in loo diro wakaaladda hirgelinta sharciga ee awoodda sharciga u leh guriga cusub muddo 24 saac gudaheeda marka la baddalo guriga haddii ogeysiiska la siiyay maamulaha maxkamadda ama wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka ee awooda u leh guriga cusub uu arjiilaha daggay.